

Ku saabsan tallaalka ka hortaga covid-19

Dhammaan dadka jooga Iswiidhan ee ah 12 jir ama ka weyn ayaa heli kara tallaalka ka hortaga covid-19. Uma baahnid in aad muwaadin Iswiidhish ah tahay si aadu hesho tallaalkan. Tallaalka ka hortagga covid-19 waa wax qofku iskii u doorto oo waa bilaash.

Haddii aad ku nooshahay ama wakhti dheer joogtay gudaha Iswiidhan, waxaa laguugu casuumi doonaa tallaalka. Xitaa dadka magan-gelyo doonka ah iyo kuwa jooga gudaha Iswiidhan ee bilaa sharciga ah waxaa si bilaash ah lagu casuumayaa tallaalka ka hortaga covid-19.

Macluumaadkaaga waa la ilaalinayaa

Marka aad daryeel caafimaad raadsatid si lagu tallaalo ma jirto cid shaqaale ah oo macluumaadkaaga bixin karta adigoo aan taas oggolaan. Shaqaalaha caafimaadka waxaa saaran waajib sir qararin. Tani micnaheedu waa in macluumaadkaaga la ilaalinayo iyo in shaqaalaha daryeelka caafimaadka aan loo oggolay inay bixiyaan macluumaad ku saabsan cudurkaaga, daryeelkaaga ama xaaladaada gaar ahaaneed. Waajibka sir qarintu wuxuu khuseysaa dhammaan bukaansocotada, ma khuseyso xitaa haddii aad xaq u leedahay inaad joogto Iswiidhan ama aanad xaq u lahayn.

Dukumiinti aqoonsi

Haddii aad haysato dukumiinti aqoonsi oo ansax ah waa in la soo qaato si loo tuso xilliga tallaalka. Haddii aanad haysan wax dukumiinti aqoonsi ah, lambarka shakhsi ama lambarka shakhsiga ee ku meel gaarka ah, weli waad is tallaali kartaa. Laamaha caafimaadka ayaa ku siinaya nambarka ku meel gaar ah oo aad u baahantahay in aad keydsatid. Haddii aad nambarka horay u haysatay waa isticmaali kartaa kaas. Lambarkaas waxaa lagu isticmaalaa dhinaca daryeelka bukaanka oo keliya oo ma loo isticmaali karo ama ma raad raaci karto hey'ad dawladeed oo kale.

Tallaalada waa la diiwaangelinayaa si loola socda

Dhammaan daryeel bukaan, xitaa tallaalada, waxaa lagu diiwaangeliyaa nidaamdiwaan si daryeelka bukaanku u awoodo bixinta dawo oo la socdo bukaan socotada. Waa muhiim in aad haysatid dukumiinti aqoonsi ah ama in marka lagu tallaalayo lagu siiyo lambar ku meel gaar ah si shaqaalaha daryeelka bukaanka ay u awoodaan inay qoraan nooca tallaal ee aad heshay, haddii aad leedahay wax calaamado cudur ah iyo haddii aad qaadata wax dawooyin ah.

Haddii ay kugu yimaadaan waxyeelooyin ama aad u xanuusato qaab kale ka dib tallaalkan waxaa muhiim ah in aad ogaato nooca tallaal ee aad qaadatay iyo goorta ay ahayd. Adigu waxaad keydin kartaa koobiga diiwaan ku qoran warqad oo tusaysaa daryeelka caafimaadka marka loo baahdo. Isbitaalada iyo gobolada kala duwan waxay lahaan karaan nidaamyada diiwaan oo kala duwan. Sidaas darteed waa muhiim in aad kaydsatid dukumentiga gaar ah ah tallaalka.

Naftaada iyo dadka kaleba ka ilaali covid-19

Qof walba mas'uuliyad gaar ah ayaa ka saaran in laga hortago faaftaanka cudurrada faafa. Tallaalku waa qaabka ugu fiican ee lagu yareyn karo cudur halis ah iyo faaftaanka covid-19. Haddii aadan tallaalneyn, waxaad u baahan tahay in aad

- dadka kale masaafu u jirsato
- iska ilaalisaa ciriiriga iyo meelaha gudaha ah ee dadweyne badan ku urureen.

Xitaa marka aad tallaalantahay waa muhiim in guriga la joogo haddii aad xanuusanayso. Weli wuu socdaa faaftaanka cudurka covid-19.

MACLUUMAAD KU SAABSAN COVID-19 OO LUQADO KALA DUWAN AH



Bogga intarnatka ee [1177.se](https://www.folkhalsomyndigheten.se) ayaad ka helaysaa warbixin ku saabsan meesha aad ka heli karto tallaalka lagaga hortagayo covid-19 ee gobolka aad adigu joogto.

Vaccination
mot covid-19